

مسارات
خيرية CHARITABLE
PATHS

Tirsiga (37) Sept 2024



DARYEELKA CAAFIMAADKA





08



ADEEGYADA IYO
HAWLAHA SAMAFAL
EE CAAFIMAADKA



04



MASHAARIICDA
BIYAHA IYO
FAYADHOWRKA



06



MASHAARIICDA
DHISMAHA



09



MASHAARIICDA
XOOGSI XALAAL AH



10



AQOON & OGAAL



11



HAWLAHA
WAXBARASHADA



A.R.C

Address: Barbera Road - Hargeisa
Mobile: +252633278253
Phone: +252514333
E-Mail: somalia.office1@gmail.com
Website: www.arcsom.org

مسارات
خيرية CHARITABLE
PATHS

WAA DHANBAAL BILLE AH OO
HAYADDA GARGAARKA AFRICA
(A.R.C) AY KAGA WARRANTO
MASHAARIICDEEDA HORUMARINEED
IYO BANI-AADAMNIMO .
TIRSIGA (37) SEPT 2024





GOLAHA LATALINTA ARC ISU KAASHIGA HAWLAHA SAMAFAL IYO BULSHO



Hay'adda Gargaarka Afrika (ARC) si ay u sii xoojiso dadaalladeeda ka midha dhalinta hawlaha samafal ee ay Somaliland ka waddo, waxa ay dhistay golaha latalinta ARC oo ka kooban xubno laga soo xulay masuuliyiinta iyo haldoorka bulshada deegaannada kala duwan ee Somaliland. Golahan ayaa ay ujeeddadiisu tahay in waayoaragnimada xubnaha golahan looga faa'idaysto, sidii kaalmada samafal loo gaadhsiin lahaa bulshada u baahan.

Golaha ayaa yeeshay kulankiisii Koowaad ee aasaaska, kaas oo ay kaga doodeen yoolasha istaartijiyadeed ee golaha iyo hay'addaba, doorarka ay gole ahaan qaadan karaan, iyo iskaashiga ay ka samayn karaan horusocodka iyo habsami u shaqaynta hawlaha samafal ee ARC.

Golaha latalinta ayaa xoogga saari

doona wacyigelinta qadiyadaha raadka ku yeelanaya bulshooyinka Somaliland, kor u qaadista taageerada, iyo dhismaha jaalka lala noqonayo ururrada iyo hay'adaha maxalliga ah, kuwa dawladda iyo shirkadaha shaqo-wadaagta la yahay. Sida oo kale waxa uu ka shaqayn doonaa xoojinta raadka hay'adda, iyo xidhiidhada ay la leedahay bulshada deegaanka, si loola socdo baahiyahooda, loona xaqiijiyo in ay waafaqsan yihiin hawlaha hay'adda iyo sida ay mudnaanta ugu kala leeyihiin.

Dhismaha golaha latalintu waa tallaabo muhiim u ah dadaallada ay ARC ku xoojinayso waxtarka mashaariicda ay ka waddo Somaliland, iyo in looga faa'ideeyo shakhsiyaadka saamaynta leh ee ay ka go'antahay in ay ka qaybqaataan hawlaha samafalka.

MASHAARIICDA BIYAHA IYO FAYADHOWRKA



JIGJIGA: CEEL RIIG AH OO LEH BIYO SOOSAAR KORONTO KU SHAQAYNAYA

ARC ayaa xadhigga ka jartay ceel biyood riig ah oo ay ka hirgelisay deegaanka magaalada Jigjiga ee xarunta dawlad-deegaanka, ceelkan oo dhererkiisu yahay 100 – 150 mitir, waxaa la socda qalabka biyo soosaarka oo ku shaqaynaya koronto, iyo qalabkii korontada qorraxda ka dhalinayey, mishiin dab-dhaliye ah, iyo taangi biyaha lagu kaydino oo qaadaya 15000 oo litir.

Madaxa xafiiska ARC ee Jigjiga oo munaasabadda xadhig ka jarista ka hadlay ayaa tilmaamay muhiimadda uu leeyahay mashruucani, “Ceelkani waxa uu halbawle nololeed u noqonayaa bulshada deegaankan laga qoday, waxa aanu kaalin muuqata ku yeelan doonaa wanaajinta duruufaha nololeed ee 2400 oo qof oo ah

dadka celcelis ahaan uu waraabin karo ceelku”

Mudane Cabdiraxmaan Khadar waa uu intaas ku daray, biyaha nadiifta ah ee ceelkan laga helayo iyo nidaamkan loo diyaariyey ee suurtagelinaya in uu jooqto u shaqeeyaa, in ay gacan ka geysanayaan yaraynta dhibaataada biyo yaraanta qoysaska deegaanka, iyo xoojinta ku negaanshiyaha deegaankooda.

Mashruucani waxa uu qayb ka yahay Barnaamijka biyaha iyo daryeelka deegaanka ee ARC, kaas oo ay sannad kasta ka faa’idaystaan boqollaal qoys oo ku nool dhulka Soomaalida ee gobalka Geeska Afrika.



ARC OO XADHIGA KA JARTAY SADDEX CEEL BIYOOD OO CUSUB

Hay'adda Gargaarka Afrika (ARC) ayaa xadhiga ka jartay saddex ceel biyood oo cusub, kuwaas oo laba ka mid ah ay ka hirgelisay deegaananda gobalka Maroodijeex ee Somaliland, halka ceelka kalana ay ka qodday duleedka magaalada Jowhar, Soomaaliya.

Ceelashan oo jooggoodu u dhexeeyo 10 – 15 mitir, ayaa mid kastaa uu ku filan yahay in uu waraabiyo kun qof Maalintii. Waxaana maalgeliyey samafalayaal u dhashay

dalka Kuweyt oo soo mariyey hay'adda caalamiga ah ee ALRAXMA Kuweyt.

Mashruucani waxa uu qayb ka yahay Barnaamijka biyaha iyo deegaanka ee ay hay'adda ARC ka fuliso deegaannada Soomaalida ee gobalka Geeska Afrika, kaas oo ay ujeeddadiisu tahay in biyo la cabbi karo la gaadhsiyo qoysaska danyarta ah ee ku dhaqan deegaannada oomanaha ah ee gobalkan.



MASHAARIICDA DHISMAHA

DHISMAHA RUGTA CAAFIMAADKA EE AMAL OO
MEEL FIICAN MARAYSA

Waxaa meel gebogebo ah maraya dhismaha Rugta Caafimaadka ee Amal oo ay ARC ka waddo magaalada Borama ee gobalka Awdal, Somaliland. Xaruntan oo ay maalgelisay hay'adda caalamiga ah ee ALRAXMA ee dalka Kuweyt, waxaa dhammaystirmay dhismihii guud iyo kaabayaasha badankoodii, waxaana hadda bilaabmaya marxaladda ku xigta oo ah qurxinta iyo dhammaystirka dhismaha, iyo keenista iyo Rakibista qalabka caafimaadka ee lagama maarmaanka ah.

Rugta caafimaadka ee Al-Amal oo si casri ah loo qalabayn doono, ayaa uu qorshuhu yahay in ay dadka degmada Boorama siiso adeegyo caafimaadka oo dhammaystiran. Mashruucani waxa uu qayb ka yahay Barnaamijka caafimaada ee ay deegaannada Soomaalida ka waddo hay'adda ARC, iyada oo maalgelinta ka helaysa hay'adda caalamiga ah ee ALRAXMA ee dalka Kuweyt.





ARC AYAA MASAAJID CUSUB KA HIRGELISAY HARGEYSA

Hay'adda Gargaarka Afrika (ARC) ayaa ku guulaysatay dhammaystirka masaajid cusub oo ay ka hirgelisay magaalada Hargeysa. Masaajidka oo laga dhisay goob aad ugu baahnayd waxa uu halkii mar qaadayaa 116 qof. Waxaana loo dhammaystiray kaabayaasha muhiimka u ahaa oo ay ka mid yihiin kaydka biyaha, qaybta waysada, gogosha, cod-baahiyeyaasha

iyo kutubta Qur'aanka Kariimka ah.

Dhismaha masaajidka ayaa qayb ka ah Barnaamijka horumarinta waxbarashada, iyo dhaqanka ee ay hay'adda ARC ka fuliso dhulka Soomaalida ee gobalka Geeska Afrika. Waxaana maalgeliya samafalayaal u dhashay dalka Kuweyti oo soo mariya hay'adda caalamiga ah ee ALRAXMA, Kuweyt.



DARYEELKA CAAFIMAADKA

Caqabado badan oo caafimaad ayaa ka jira deegaannada Soomaaida, dib u dhaca dhaqaalaha, iyo colaadaha iyo xasiloonidarrada meelo badan ka jira ayaana sabab u ah in awood loo waayo buuxinta baahiyaha caafimaad ee muwaadiniinta. Sida ku soo baxday warbixin sannadeedka 2024 ee hay'adda caafimaadka adduunka (WHO), nidaamka caafimaad ee Soomaaliya ayaa aad u liita, awoodna aan u lahayn in uu ka jawaabo baahiyaha bulshada oo dhan.

Inkasta oo xaaladu ka soo raynaysay sannadihii u dambeeyey, haddana dad tiradoodu ka badan tahay 6.9 Milyan ayaa weli u baahan kaalmo bani'aadamnimo oo uu gargaar caafimaad ka mid yahay. Xaaladaha caafimaad ee jira waxaa ka mid ah nafaqodarrada ka dhalatay cunto yaraanta iyo cudurrada faafa ee ay ka mid yihiin jadeecada iyo shuban biyoodku.

Hay'adda Gargaarka Afrika (ARC) iyada oo taas maanka ku haysa, waxa ay dirtay kolonyo dhakhaatiir ah oo adeeg caafimaad oo lacag la'aan ah gaadhsiiya deegaannada baadiyaha iyo xaafadaha danyarta ee magaalooyinka Hargeysa iyo Boorama. dhakhaatiir takhasusyo kala duwan ah oo ka socday cisbitaalka caalamiga ah ee Hargeysa (Hargeisa International hospital – HIH) ayaa adeegyo isugu jira waraysi, shaybaadh, latalin iyo daweyn, waxa ay siiyeen bukaan tiradoodu dhan tahay 800 oo ay kula kulmeen deegaannada kala duwan. Iyada oo dadka xaaladahoodu culustahayna loo gudbiyey cisbitaalka 'International Hospital' ee magaalada Hargeysa.

Agaasimaha cisbitaalka Hargeysa international, Dr. Axmed Muctamad oo ka hadlay ololahan caafimaad

ayaa sheegay in marka laga tago dadka bukaanka ah ee la siiyey adeegyada caafimaad iyo dawooyin bilaashka ah, in ay jiraan 16 bukaan ah oo iyaga cisbitaalka loogu sameeyey qalliino kala duwan oo guulaystay. Dr. Muctamad waxa uu bogaadiyey dadaalka weyn ee ay dhakhaatiirta cisbitaalku geliyeen sidii uu mashruucani midhadhal u noqon lahaa.

Waxaa isaguna munaasabaddii bilowga ololahan furay Dr. Cabdiraxmaan Mucallimi, maamulaha guud ee ARC oo dawladda iyo shacabka Kuweyt ku bogaadiyey sida joogtada ah ee ay uga qaybqaataan hawlaha samafal ee ay ARC ka waddo guud ahaan deegaannada Soomaalida ee gobalka Geeska Afrika. Waxa uu sheegay, in ololaha caafimaad uu ka mid yahay mashaariicda ay maalgeliso hay'adda caalamiga ah ee ALRAXMA oo dalka Kuweyt laga leeyahay.

Dhinaca kalana qaar ka mid ah dadkii bukaanka ahaa ee ka faa'idaystay mashruucan ayaa dawladda iyo shacabka Kuweyt uga mahadnaqay caawimadan bani'aadamnimo ee ay heleen, iyaga oo hay'adda Gargaarka Afrikana ku bogaadiyey joogtaynta hawlaha bani'aadamnimo ee ay gaadhsiiso dadka Soomaaliyeed ee ku nool goballada kala duwan ee gobalka.

Sannad kasta boqollaal bukaan ah ayaa ka faa'idaysta ololayaasha caafimaad ee ay dhakhaatiirta hay'adda ARC, ku tagaan deegaannada kala duwan ee Soomaalida. Kuwaas oo dadka bukaanka ah bilaash ku siiya adeegyo ay ku jiraan kuwo takhasus ah oo kharashaad badani ku bixi lahaayeen iyo dawooyinka ay u baahan yihiin.

MASHAARIICDA ARRIMAHA BULSHADA



ARC Ayaa Meherad U Maalgelisay Qoys Danyar Ah



Hay'adda ARC ayaa magaalada Burco ku qaybisay miisas booshari iyo buudhiyo taayiro leh oo u diyaarsan meherado Khudaarta lagu iibiyo. Mashruucan ayaa qayb ka ahaa dadaalka ay ARC ku doonayso in ay qoysaska qoysaska danyarta ah u abuurto ilo dakhli oo joogto ah, si loo xoojiyo isku filnaanshiyaha bulshada iyo wanaajinta heerkooda nololeed.

Mashruuca kor u qaadista nolosha dadka danyarta ah oo lagu magacaabo 'Xoogsi xalaal ah', waxa uu qayb ka yahay barnaamij

waafaqsan yoolka 'Horumarka Waara' ee Qaramada midoobey oo shaqadiisu tahay in dadka saboolka ah loo abuurto ilo dakhli, si loo yareeyo ku tiirsanaanta kaalmada dibadda, loona dhiirrigeliyo waxsoosaarka dhaqaale ee bulshada. Waxaa ka mid ah xirfado shaqo oo la baro, dadka xoolaha nool ka baxaan oo la xooleeyo iyo in meherado yaryar loo maalgeliyo.

Mashruucan waxaa maalgelisa hay'adda caalamiga ah ee ALRAXMA.



AQOON & OGAAL



Golaha Hawl-Socodsiinta Ee ARC Ayaa Boqoday Xafiiska Boorama



guddida hawl-socodsiinta ee ARC ayaa booqday xafiiska hay'adda ee magaalada Boorama. Waftigan oo uu horkacayey Dr. Mudahar Xuseen, ku xigeenka maamulaha guud ee dhinaca Tayada iyo hawlsocodsiinta, waxaa iyaguna wehelinayey masuuliyiin ka socotay waaxyaha hay'adda ee xidhiidhka shaqo la leh.

Ujeeddada socdaalka ayaa ahayd u xogogaal noqoshada hawlaha xafiiska ee Boorama iyo guud ahaan gobalka Awdal, iyo in la qabto tababarro kor loogu qaadayo tayada shaqo iyo diyaarsanaanta hawl-wadeenada hay'adda ee Boorama. Waxaa ka mid ahaa aqoon-isweydaarsi ku saabsanaa fududaynta hannaanka shaqo iyo macaamilka, kaas oo intii uu socday dib u eegis lagu sameeyey hab-raacyada hadda jira, laguna soo bandhigay talooyin ujeeddadoodu ahayd in la dardargeliyo lana fududeeyo shaqada hay'adda.

Aqoon-isweydaarsiga hawl-wadeennada waxaa ka soo baxay talooyin iyo tilmaamo muhiim u ah habsami u socodka shaqada, kuwaas oo kaalin muhiim ah ka qaadanaya sii wanaajinta habsami u socodka hawlaha maamulka, iyo xoojinta wada-shaqaynta qaybaha kala duwan ee hay'adda.

Dr. Mudahar Xuseen oo si kooban uga hadlay ujeeddada booqashada ayaa hoosta ka xariiqay muhiimadda uu leeyahay tababarkan, isaga oo sheegay in uu noqon karo jid loo maro kor u qaadista iyo horumarinta hawlgudashada

iyo awoodaha shaqo ee hay'adda gudaheeda.

Mudane Yacquub Al-Sharaaci oo masuuliyiinta waftiga ku jiray ayaa ka mid ahaa dadka ka hadlay aqoon-isweydaarsiga, waxa aanu faahfaahin waafi ah ka bixiyey hababka wax iibsiga. Isaga oo hoosta ka xariiqay hannaanka ugu wanaagsan ee loo mari karo hawlaha iibsiga, iyo hubinta tayada adeegyada la bixinayo, iyada oo la waafajinayo halbeegyada tayo-wanaagga ee caalamiga ah.

Salaax Aljacdi oo ah madaxa waaxda shaqaalaha, kana mid ahaa masuuliyiinta tababarka bixiyey ayaa isaguna ku dheeraaday muhiimadda ay leedahay wanaajinta hannaanka shaqaalaynta, si loo helo hawl-wadeenno gudan kara shaqada lagu gaadhayo gaadhista yoolasha hay'adda. Mudane Axmed Cusmaan oo masuuliyiinta xafiiska shaqaalaha ka mid ah ayaa isaguna tababartayaasha la wadaagay habraacyada shaqaalaynta ee waafaqsan halbeegga tayo-wanaagga ee caalamiga ah. Isaga oo dul istaagay hababka lagu wanaajin karo hannaanka xulashada shaqaalaha iyo shaqaalayntiisa, si loo helo hawl-wadeenno kuf u ah shaqada.

Booqashada waftigan ayaa qayb ka ahayd dadaallada ay ARC ku horumarinayso xirfadda shaqaalaha, kuna wanaajinayso hannaanka shaqo ee hay'adda. Taas oo kaalin ka qaadanaysa xoojinta awoodda ay hay'addu u leedahay ka jawaabista baahiyaha samafal ee bulshada ay u adeegto.

WAXBARASHADA



Dugsiyada Kuweytiga Oo U Dabbaaldegey Xuska Dhalashadii Nebiga (SCW)



Xarumaha waxbarashada ee Kuweytiga ayaa qabtay munaasabado ay ardayda ku xusayso dhalashadii Nebi Muxamed (SCW). Xaflado kala duwan, hadallo waano ah, iyo casharro ku saabsan taariikhdi iyo mucjisooyinkii Nebiga (SCW) ayaa lagu soo bandhigay munaasabado lagu qabtay dugsiyada kala duwan. Waxaa ka mid ahaa masraxiyado ay ku jileen taariikhda Islaamka, tartanno la xidhiidha taariikhda Rasuulkeennii sharafta lahaa (SCW).

Ardayda, macallimiinta iyo maamulka dugsiyada Kuweytiga, iyo masuuliyiin ka socday Barnaamijka waxbarashada ee hay'adda ARC ayaa ka qaybgalay munaasabadaha dabbaaldeegga. Barnaamijkani waxa uu qayb ka haa in ardayda lagu baraarujiyo qiyamka wanaagsan ee islaamka, muhiimadda taariikhda Islaamka iyo kaalinta weyn ee uu Nebigu (SCW) ku leeyahay quluubta Muslimiinta oo dhan.



Maalinta Caalamiga Ah Ee Macallinka




Maalinta caalamiga ah ee macallinka ayaa si weyn looga xusay dugsiyada, xarumaha waxbarashada Kuweytiga oo ka mid ah Barnaamijka waxbarashada ee ARC. Munaasabado si heersare ah loo agaasimay oo lagu maamuusayo macalimiinta iyo masuuliyiinta waxbarashada ayaa lagu qaybtay xarunta Kuweytiga, qaybaheeda Hablaha iyo wiilasha labadaba.

Waxaa munaasabadda lagu soo bandhigay suugaan iyo masraxiyado ka warramaya xurmada iyo jacaylka uu macallinku mudan yahay. Sida oo kale xubno ka mid ah ardayda ayaa ka jeediyey khudbado wacyigelin ah oo ay kaga warramayaan kaalinta uu macallinku ku leeyahay dhismaha maskaxda iyo jihaynta Afkaarta.

Munaasabadda waxaa abaalmarinno lagu guddoonsiiyey macallimiin kala duwan oo la guddoonsiiyey shaahod sharafyo lagu qirayo dadaalka dheeraadka ah ee ay sida joogtada ah u geliyaan, dhismaha mustaqbalka ubadkeenna.

Munaasabaddan waxa ay ujeeddadeedu ahayd in bulshada lagu baraarujiyo wanaagga iyo abaalka uu macallinku mudan yahay, iyo doorka uu ku leeyahay horumarinta bulshada iyo dhismaha mustaqbalkooda. Macalimiinta ayaa iyaguna dhankooda ka mahadceliyey qaddarinta iyo soo dhoweynta ay kala kulmeen ardaydooda.





@africanreliefco



Address: Barbera Road - Hargisa

Mobile: +252633278253

Phone: +252514333

E-Mail: somalia office1@gmail.com

Website: www.arcsom.org

